

Waa in uu karantiil galaa qofka u dhowaaday qof looga shakisan yahay omikoroon

Waxay dawladdu go'aamisay in karantiil lagu soo rogo xataa dadka kale ee u dhowaada qof cudurka laga helay, oo looga shakisan yahay in uu qaaday nooca omikoroon. Hadda wuxuu karantiilku waajib ku yahay dadka qofka guriga la deggan iyo kuwa kale ee uu xiriir soke oo sidaas oo kale ah la leeyahay.

Dadka u dhowaaday qof gooni loo bixiyay kaddib markii loo maleeyay ama la xaqiijiyay in qofku qaaday omikoroon, waxay gelayaan 10 maalin oo karantiilka u dhowaashaha qof cudurka laga helay ah. Waajibku meesha waa ka baxayaa haddii gadaal laga soo caddeeyo in aan cudurka la qaaday ahayn nooca omikroon.

- [Qeexidda u dhowaashaha \(FHI\)](#)

Dhammaan dadka u dhowaada qof looga shakiyay in uu qaaday nooca omikoroon waa in ay, kaddib markii ay qofka u dhowaadeen, tijaabo PCR ah iskaga qaadaan sida ugu dhakhsaha badan ee suuraggalka ah iyo mar kale maalinta 7-aad. Karantiilka waa laga bixi karaa haddii qofka cudurka looga waayo tijaabada laga qaado maalinta 7-aad u dhowaashadii kaddib.

– Waxaan ku khasbannahay in ay jiraan tillaabooyin lagu joojinayo faafidda isqaadsiinta nooca omikoroon. Wax nolosha dadka faragelinnaya ayaa loo arki karaa karantiilka lagu soo rogay dadka kale ee u dhowaaday qof cudurka laga helay, laakiin waxaa lagu jiraa xaalad halis ah oo ay aqoonta loo leeyahay fayraska noociisaan tahay mid aan la hubin, ayay tiri wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka Ingvild Kjerkol.

Maaddaama hadda la soo rogayo tillaabooyin lagu yaraynayo isu imaatinka dadka ayaa waxaa yaraan doona dadka qofku u dhowaanayo – hawlaha raadraaca cudurka ee degmooyinkuna way fududaan doonaan.

Mararka aan qofka looga shakiyin omikoroon, waxba laga beddeli maayo karantiilkii qofka u dhowaada qof cudurka laga helay. Xeerarka ka yaalla marka loo dhowaaday qof cudurka qaaday, laakiin aan looga shakisanayn in uu omikoroon qaaday [waxaad ka akhrisan kartaa bogagga internetka ee FHI](#).

– Taasi waxay ka dhigan tahay in aan in muddo ah yeelan doonno labo rajiim oo TISK (Tijaaba-qaad, Gooni u-bixid, Raadraaca Cudurka, Karantiil) oo kala duwan. Mid waxaa loogu tala galay dadka looga shakisan yahay in ay qaadeen nooca omikoroon – midka kalena qofka qaada noocyada kale. Si joogto ah ayaan ula socon doonaa istaraatiijiyadda TISK, aniga oo u eegi doona xaaladda is-qaadsiinta cudurka, ayay tiri Kjerkol.